

Wadooyin Dadka oo Dhan Amaan U Ah

Qorshaha Nabadgelyada Wadooyinka



SAINT PAUL
PUBLIC WORKS

Dulmar guud mashruuca

Magaalada St. Paul waxa ay diyaarineysaa Qorshaha Nabadgelyada Wadooyinka si loo aqoonsado oo meesha looga saaro dhimashada iyo dhaawaca khatarta ah ee ka dhasha shilalka gaariga ee dadka oo dhan (dadka lugeynaya, bushkuleetiyada, dadka isticmaala gaadiidka dadweynaha iyo wadayaasha).

Iyada oo la tixgelinayo ra'yiga dadweynaha, qorshahan waxa uu muhimad gaar ahaan siinayaa wadooyinka iyo agabka lagu isticmaalo ee wax looga qaban karo taxadiga la xiriira amaanka iyo maalgelinta mustaqbalka ee mashruucyada la xiriira amaanka.

Qorshahan waa mid ay ka wada qeyb qaadanayaan dadka iyo bulshada ay si gaar ah u taabatay dhaawacyada iyo dhimashada la xiriirta gaadiidka— oo ay ka mid yihiin dadka lugeynaya, bushkuleetiyada, iyo dadka ka aanu horay u gaarin adeegga— lagu horumarinayo amaanka dhamaan dadka isticmaala.

Maxay tani muhim u tahay

Marka la dhameystiro, talaabooyinka iyo mashariicda ku xusan qorshahan waxa ay yareyneysaa shilalka gaadiidka iyada oo wax looga qabanayo dadka sida taxadar la'aanta ah u wada gaadiidka ama ka mashquula wadidda gaariga iyo kuwa ku socda xawaaraha dheer.

Waxaanu dooneysaa inaad nala wadaagto waxyaabaha muhimka kuu kah dhinaca badbaadada wadooyinka Ra'yigaaga waa mid aad muhim u ah waxaana ku xiran in aan ogaano mashruuca muhimadda la siinayo ee amaanka wadooyinka.

Marxaladaha Mashruuca:

Xagaaga 2023	Juun 2023	Kuleylaha 2023 – Qaboobaha 2024
<p>Bilawga ugu horeeya ee Qorshaha Nabadgelyada Wadooyinka</p> <ul style="list-style-type: none">Ra'yiga hay'adaha ka qeyb qaadanaya iyo dadweynaha	<p>Codsiga maalgelinta</p> <ul style="list-style-type: none">Helitaanka dhaqaalaha mashruuca badbaadada wadooyinka	<p>Ka qeyb gelinta hay'adaha daneynaya iyo diyaarinta qorshaha</p> <ul style="list-style-type: none">Ogolaashaha gudiga mgaalada ee qorshaha ugu dambeeya



Ujeedada magaalada waa in la yareeyo oo la joojiyo dhimashada iyo dhaawaca ka dhasha ee qof kasta oo degan St. Paul.



Dadka lugeynaya



Bushkuleetiyada



Dadka isticmaala gaadiidka dadweynaha



Wadayaasha gaadiidka



Ujeedooyinka Mashruuca

- ✓ Marti geli Qorshaha Nabadgelyada Wadooyinka si muhimad loo kala siiyo mashruuca qorshaha nabadgelyada wadooyinka ee ay tilaameen dadka deggan St. Paul.
- ✓ Codsii u soo qoro Dhaqaalaha Mashaariicda Wadooyinka ee Dawladda Federaalka Haddii la ogolaado mashruuca, dhaqan gelinta mashruuca badbaadada.

- ✓ Ogaashaha mashruuca kaabayaasha dhaqaalaha, istaraatiijiyadda, iyo nidaamka wax looga qabanayo lagu yareynayo shilalka gaadiidka.
- ✓ Horumarinta sida magaaladu u doorato una naqshadeeyso mashaariicda mustaqbalka ee lagu horumarinayo amaanka wadooyinka.



St. Paul Amaan Ah Oo Dadka Dhan U dhaxeysa

Barnaamijkan waxa uu qorshaha magaalada u taageerayaa:

- Helitaanka dhaqaale loo helo mashruucyada amaanka ee mustaqbalka taasoo lagu yareynayo dhimashada iyo dhaawaca ka dasa shilalka, iyo horumarinta dadaalka magaalada amaanka gaadiidka.
- U sinaashaha qorsheynta oo ay ka mid tahay bulshada laga tirada badan yahay ee horay loo faquuqay lana abuurto nidaam gaadiid oo loo siman yahay lana wada heli karo.



Waxaanu dooneynaa inaad ra'yigaaga ka dhiibato!

Nala wadaag sida ay kula tahay in St. Paul looga dhigi karo meel amaan u ah dadka lugeynaya, bushukuleetiyada raaca, isticmaala gaadiidka dadweynaha, iyo waadayaasha gaadiidka.



[stpaul.gov/
TransportationSafetyPlan](https://stpaul.gov/TransportationSafetyPlan)

La xiriirayo

Waaxda Hawlaha Guud

David Peterson, Maamulaha Mashruuca

✉ David.Peterson@ci.stpaul.mn.us

Ma dooneysaa turjubaan? Soo wac 651 651-266-6100.
¿Necesita esta traducción? Comuníquese con nosotros al 651-266-6100.
Ma u baahan tahay tarjamadaan Nago soo wac 651-266-6100.
Xav tau qhov no txhais los? Hu rau peb ntawm 651-266-6100.

Maarso 2023